

Pseudomonas aeruginosa (CRPA) iska caabinta Carbapenem

CRPA waa bakteeriyo ku faafتا xarumaha daryeelka caafimaadka wayna adkaan kartaa in la daweyyo.



WAA Maxay CRPA?

- CRPA waa nooc bakteeriyyada kamid ah oo keeni karta caabuqyo xun.

MAXAY khubaradu uga walaacsan yihiin? MAXAAN ugu baahan nahay inaan ka walwalno?

- CRPA way adkaan kartaa in la daweyyo waayo badanaa ka maraan daawooyinka bakteeriyyada dila.
- Wuxuu si fudud iskaga gudbaa dadka, ama goobaha bakteeriyyada leh iyo qalabka caafimaadka ee la wadaago.
- Inta badan dadka qaba CRPA ayaan lahayn wax astaamo ah ama calaamado ah; tan waxaa loogu yeeraa colonization (guumaysi cudur).
- Caabuqyada CRPA ayay adkaan kartaa in la daweyyo waxayna keeni karaan xanuun daran ama dhimasho.

YAA khatarta ugu wayn ugu jira qaadista CRPA?

- Dadka jooga xarumaha daryeelka caafimaadka ee qaba dhaawacyada furan ama tuuboooyinka la gasho jirka (tusaale, tuuboooyinka quuddinta, tuuboooyinka neefsiga, iyo tuubada dhuunta).
- Dadka nidaamyada difaaca jirkood uu liito.
- Waxyaabaha khatarta kordhinaaya waxaa kamid ah qabista taariikhda xanuunada badan, qaliinka dhawaa, ama nabarada badan ee maqaarka.
- Dadka caafimaadka qaba ayay yar tahay fursada qaadista CRPA .

SIDEE uga difaaci karaa bukaanadeena CRPA?

- Adeegso kahortagyada taabashada (tusaale, nadaafada gacmaha, shuluga caafimaadka, iyo gacmo gashiyada) marka aad daryel siinayso qof lagu ogyahay ama looga shakiyay CRPA .
- Si adag jeermiska uga dil goobaha iyo qalabka caafimaadka.
- Mar kasta raac tilmaamaha keli-yeelida ee ku qoran qolka bukaanka.

XAGEE ayaan ka heli karaa xog dheeri ah?

- www.sdhai.org

09/20/2023